



FIKRADA

Xarunta cusub ee loo yaqaan 'Cherry Creek Innovation Campus'-Xarunta Hal-abuurka wuxuu noqon doontaa dugsiga farsamada, xirfada iyo shaqo diyaarinta oo ay ka heli karaan ardayda dugsiga sare ee cherry creek. Iyada oo manhajka uu ku saleysan yahay xirfadaha-dhabta ah iyo shahaadooyinka ganacsiga laga soo bilaabo cilmiga kumbuyuutarka ilaa duulista iyo caafimaadka, xaruntan waxay ardayda siin doontaa xiriiriyaha isku xira kuliyadaha iyo shaqooyin guul leh.

Waaxda Shaqada iyo Farsamada (CTE) dugsiga CCIC wuxuu balaarin doontaa adeega iyo balanqaaka degmada si loogu diyaariyo ardayda baahida waxbarasho iyo xirfadeed ee qarnigan 21-aad. Khibrada barashada ardayga waxay la jaanqaadi doontaa jawiga shaqo ee farshaxanka-casriga ah, iyadoo xooga la saarayo sidii ardayda wax loogu dhigi lahaa hab dhaqanka shaqooyinka casriga ah oo cimilada ku saleysan.

Dugsiyada sare waxay sii wadayaan marti gelinta barnaamijyo badan oo CTE ah. Xaruntan cusub waxay sare u qaadeysaa barnaamijyada hada jira, waxayna sidoo kale hoy u noqon doontaa fursado waxbarasho oo casriyeysan oo ardayda loo sii habeeyay .

*Dhiirigelinta arday kasta
inuu fikiro, wax barto,
inuu guuleysto, inuu
daryeelo.*

— CCSD Mission

BARNAAMIJYADA

Waxsoosaarka Horumarsan

Curinta | Wax soo saarka | Farsamaynta

Adeegyada Ganacsiga

Ganacsi | Suuq Geynta Ganacsiga
Maaraynta Mashruuca

Cafimaadka iyo Ladnaanta

Pharmacy Tech | CNA | OT/PT
Caafimaadka hab Dhaqanka Maskaxda

Soo dhawaynta Martida iyo Dalxiiska

Makhaayada Ardayda | ProStart | Qorshaynta
Kulanka / Maaraynta Dalxiiska

Injineeriyada Kaabayaasha

(Abuurista Ganacsiga)

Maaraynta Dhismaha | Fikrada Dhisme weyn

IT & STEAM

Amniga internetka | Xogta Sayniska | Drones
Naqshada fikirka | Virtual Reality | Robadk

Gaadiidka

Farsamada Gawaarida | Dayactirka Duulista



CHERRY CREEK INNOVATION CAMPUS

8000 South Chambers Road, Centennial, CO 80112
720-554-2600

For more Information

ccic.cherrycreekschools.org



XARUNTA HA-ABUURKA

CHERRY CREEK



Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools



Scan me

DUGSIGA HAL-ABUURKA EE CHERRY CREEK

FURITAANKA
AUGUST, 2019

 DLR Group

JHL
CONSTRUCTORS



Dedicated to Excellence
Cherry Creek Schools



XARUNTA

Dugsiga CCIC, wuxuu ku yaalaa bartamaha dooxada Dove, waana 17,000 oo laba jibaaran, waana xarun leh farshaxan-casriyeysan. Ardayda iyo iskaashatada ganacsatada waxey si sahlan u imaan karaan xarunta dugsiga, oo laga dhisay dhul dhan 40-hektar oo u dhow garoonka diyaaradaha ee Centennial iyo xarunta Teknoologiyada ee Denver.

Ardayda ka qayb-qaadanaysa barnaamijka dugsigan waxey shahaadooyinkooda ka qaadanayaan dugsiga sare e ay hada dhigtaan ee xaafadooda. Ardayda waxey imaan doonaan CCIC maalin kasta wakhtiga subaxdii ama galabtii, waxaana jiri doona gaadiid ka soo qaada kuna celiya dugsigooda.

Hadii dugsiga sare ka dib qorshaha ardaygu yahay inuu galo kuliyada, militariga, ama uu si toos u galo shaqo,

Dugsiga CCIC wuxuu bixin doona fursado uu ardaygu ku

heli karo boondooyin ama dhibco kuliyada ama shahaadooyin la aqoonsanyahay oo xirfadeed. Waxaa naga go'an inaan daraja sare oo faa'iido leh gaarsiino dhamaan ardayda ka qalin-jabisa dugsiyada cherry creek. Had iyo jeer waxey noo tahay maalin wanaagsan dhamaan dugsiyada cherry creek!